

Infekshanada Coronavirus

MERS-CoV (Astaamaha coronavirus ee neefsashada la xiriirta ee Bariga Dhexe)

Waa maxay infekshanada coronavirus?

Coronaviruses waa koox balaaran oo fayrasyo ah oo dadka u keeni kara jirooyin kala duwan, laga bilaabo hargabka caadiga ah ilaa SARS (Calaamadaha neefsasho ee aad ka u daran). Fayrasyada ay ka kooban tahay kooxdani wuxuu sidoo kale jiro u keeni karaa xayawaanka.

Waa maxay MERS?

MERS waa cudur sambabada ku dhaca oo uu keeno coronavirus cusubi. Dhakhtaradu waxay markii u horeysay bilaabeen in ay arkaan MERS bartamihii 2012-kii. Waa jiro halis ah oo dhimasho keeni karta. Infekshanada MERS intooda badan waxay ka dhaceen dawladdaha ku yaala Jasiiradda Carabta ama meel u dhow. Dhacdooyinka laga soo sheegay meelaha kale waxay dhamaan salka ku hayaan Jasiiradda Carabta.



Sidee ayay dadku u qaadaan MERS?

Wali waxbaan ka ogaanaynaa habka uu u faafo MERS. Dadku waxay MERS ka qaadi karaan dadka kale, laakiin mid fudud maaha.

Dadka qaarkood ee daryeelka siiyay dadkii la jiranaa MERS sidoo kale ayana waa jiradeen. Waxaa suuragal ah in MERS meelo kale ka yimaado, iyadoo ay suuragal tahay in uu xayawaanka ka yimaado.

Yaa halis ugu sugan MERS?

Ilaa hada, dhamaan dadka jiradu ka soo gaartay MERS waxay xiriir la leeyihiin Jasiiradda Carabta. Intooda badan halkaasi ayay ku nool yihiin ama dhawaan ayay safar ku tageen. Qaarka mid ah kuwaasi waxay aad ugu dhawaadeen qof dhawaan u safar ku tegay halkaasi. Dadka waayeelka ah ama dadka qaba sonkorta, cudurka sambabada ama leh dhibaatooyin kale oo caafimaad ayaa u muuqda in ay halis aad ah ugu sugan yihiin in ay u jiradaan ama ku geeriyoodaan MERS.

Waa maxay calaamaddaha iyo astaamaha lagu garto MERS?

Dadka jirada MERS waxay qabataa muddo 14 maalmood gudahood ah marka ay qaadaan. Dadka qaba MERS waxay yeeshaan qandho, qufac iyo neefsashada oo dhibta. Waxaa suuragal ah in dadka qaarkood ay yeeshaan xunqaaco iyo shuban. Khatarka ugu weyn ee qaadida infekshanku waa safar dhawaan lagu tegay Jasiiradda Carabta ama meel u dhow. Haddii adiga ama saaxiib ama qof ka tirsan qoysku uu yeesho astaamahani oo uu booqday Jasiiradda Carabta labbadii todobaad ee u dambaysay la xirii dhakhtarkaaga. Haddii ay xaqiiqdii qof neefsashadu dhibayso waxaad wacdaa 911.

Waxaan dhawaan ka imid Jasiiradda Carabta. Haddii aan jirado oo yeesho qufac, qandho oo neefsashaduna i dhibto, maxay tahay in aan markaa sameeyo?

Dadka dhawaan u safar ku tegay dawladdaha ku yaala ama ku xeersan Jasiiradda Carabtu waa in ay isla markiiba wacaan dhakhtarkooda haddii yeeshaan astaamahani. Dhakhtarkoodu kaalmo ayuu ka geysan karaa in uu ogaado haddii ay qabaan MERS,

wuu qorsheyn karaa daryeelka caafimaad ee loo baahan yahay, wuxuu talo ka bixin karaa sida looga hortago in jiradu ku faafto xubnaha qoyska ka tirsan iyo dadka kale ee bulshadooda ka mid ah.

Waxaa qorshaha iigu jirta in aan si dhakhso ah u tego Jasiiradda Carabta. Ma jirtaa talo ku saabsan tegida halkaasi?

Hay'ada Caafimaadka Aduunku (WHO) waxay ogaatay in dadka qaarkood ay halis aad ah ugu sugan yihiin in ay jiro ka qaadaan MERS. WHO waxay talo ahaan ku soo jeedinaysaa in cid kasta oo qabta sonkor, cudurka sambabada ku dhaca ama difaaca jirkoodu oo hooseeyo in uu la tashadaan dhakhtarkooda ka hor inta aanay safar u bixin. Wakhtigan la joogo, WHO ama Xarumaha la Dagaalanka iyo ka Hortaga Cudurka ee Maraykanku midkoodna ma soo jeedinayo in la beddelo qorshayaasha safar ee lagu aadayo Jasiiradda Carabta iyadoo sababtu tahay MERS.

Wixii macluumaad hada jira ee ku saabsan Ogaysiinta Caafimaad ee Safarka la Xiriira ee CDC, fiiri: wwwnc.cdc.gov/travel/notices



PUBLIC HEALTH DIVISION
971-673-1111 Telefanka
971-673-1100 Fax-ka

<http://public.health.oregon.gov>

Haddii la codsado waxaa la helayaa dukumeentigaa oo ah noocyo kale oo loogu talagalay dadka naafada ah ama ku qoran luqad aan ahayn af Ingiriiska iyadoo loogu talagalay dadka aan ku hadlin luqadda af Ingiriiska. Si aad u codsato daabacaadan oo qaab ama luqad kale ah, kala xirii Waaxda Caafimaadka Dadweynaha 971-673-1222, 971-673-0372 ee TTY.